



Maxay tahay TALAABADA XIGTA?

1. Horaanta dugsiga:

La kulan macalinka cunugaada xagga Xariirka Qoyska. Tani waa fursad weyn oo leysku barto.

- + Haddii cunugaada uu soo maray dugsiga hore (preschool) ama xanaanada cunugga, fadlan ku fakar in aad la qeybsatid macluumaadka aad ka heshay bixiyaha waxbarashada sannadaha hore.
- + Wuxaad kaloo ku fakartaa in aad la qeybsatid macluumaadka qiimeynta ee laga yaabo in aad ka haysatid cunugaada.

2. Horaanta Nofeembar:

Weydii macalinka cunugaada waxa iyada ama isaga ka ogaaday cunugaada inta ay socotay hawsha WaKIDS.

Weydii macalinka su'aalo sida:

- + Maxaad ka ogaatay waxyaabaha uu cunugeyga si wanaagsan u sameyn karo?
- + Maxaan ku sameyn karaa guriga si aan u taageero shaqada laga qabtay gudaha fasalka?

llaha:

Bogga Internetka WaKIDS

www.k12.wa.us/WaKIDS

"Introducing Me!" ("Igu Soo Dhaweynta") buug hoggaamiya wadahadalka xariirka qoyska

<https://bit.ly/2HH88Sk>

Waxbarashada Hore ee Gobolka Washington iyo Tilmaamaha Koriimada, Dhalashada ilaa Darajada 3aad

<https://bit.ly/39RcMt0>

Astaanta caadi ahaan lagu arko caruurta soo gasha xanaanada iyo cabbirka WaKIDS

<https://bit.ly/3bTsCFk>

Heerarka WaKIDS iyo Gobolka Washington

<https://bit.ly/2SPNshw>



WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF
Children, Youth, and Families




WaKIDS

360-725-6161

Washington
Kindergarten Inventory
of Developing Skills

halkaan waxaad ka heli doontaa **nuurka mustaqbalka** cunugaada!

Waad ku mahadsan tahay shaqada aad nala qabatay si xanaanada looga dhigo waayo u wanaagsan cunugaada!



gelitaanka
xanaanada

waa talaabo aad u weyn oo aad qaadaan adiga iyo cunugaada!

marka waxaa laguugu CASUMAY

...in aad ka qeybgashid barnaamijka loo sameyay in cunugaada uu ku wareego kana gaaro horumar dugsiga.

Ku soo dhawaaw sahanka

WaKIDS

Jidka lagu gaaro Guusha:

Maxay tahay **WaKIDS?**

Xirfadaha Horumarka Xanaanada
Washington (Washington Kindergarten
Inventory of Developing Skills) – ama
WaKIDS – waa hab:

- Ardayda iyo qoysaskooda loogu soo dhaweyyo xanaanada.
- Lagu qiimeeyo meelaha ardayda ku fiican yahiin.
- Looga dodo astaamaha horumarka iyo waxbarashada caruurta taasoo awood u siisa in ay ku guuleystaan dugsiga.

Ma jiro qof si wanaagsan u yaqaan cunugaada sida adiga. Wuxuu tahay xubin muhiim ah oo ka tirsan kooxda taageeri doonta waxbarashada cunugaada taasoo u fududeyn doonta ku wareegidda xanaanada ilaa inta suurtogalka ah.



Maxaa: WaKIDS.

Goorma: Marka cunugaada galoo xanaanada.

Xaggee: Dugsiga cusub ee cunugaada.

Sababta: Maxaa yeelay marka la wada shaqeeyo, waxaan abuuri karnaa bilowga ugu fiican ee suurtogalka ah kuna wajahan nolol ku dhisan waxbarasho.



xariirka
qoyska

Qoysaska iyo macalimiinta iska kaashada si ay kuu bartaan adiga iyo si ay u bartaan cunugaada.



Macalimiinta oo aqoonsada meelaha ay ku fiican yahiin caruurta si ay xoogga u saaraan kaalmada meesha aad looga baahan yahay.



qiimeynta
cunugga oo **idil**

Macalimiinta xanaanada iyo bixiyeyaa waxbarashada hore oo macluumaad qeybsada si ay caruurta ugu kaalmeyaan in ay guuleystaan.



iskaashiga
waxbarashada hore

Aburista jid si cunugaada ugu guuleysto dugsiga.



natijadda